

Fasaxa Caafimaadka Mushaharka la Qaato ee Qoyska Ogaysiiska Qoran ee Shaqaalaha

Taariikhda:

Loo-shaqeeyaha:

Cinwaanka Boostada:

Lambarka Aqoonsiga Loo-shaqeeyaha ee Fadaraalka (FEIN):

Magaca Shaqaalaha:

Taariikhda Shaqaalaynta:

Ogaysiiska wuxuu sharraxayaa xuquuqda iyo masuuliyadaha uu dhigayo barnaamijka Gobolka Maine ee Fasaxa Qoyska iyo ka Caafimaadka ee Mushaharka la Qaato (PFML). Sharcigu wuxuu dhigayaa inaynu siino macluumaadkan shaqaalaha cusub 30 maalmood ee u horreeya ee shaqaalayntooda.

Qaybta Shaqaaluhu ku Daro

Barnaamijka PFML ee Maine waxa laga maalgaliyaa tabarrucaadka mushaharka. Loo-shaqeeyayaashu waxay ka jari karaan ilaa kala-bar tabarrucaadka loo baahan yahay mushaharka shaqaale kasta (ilaa wax la mid ah waxa ka yaala waxyaalaha loo jaro Sooshiyaal Sikiyuuritiga). Waxa la jaro waxa lagu muujin karaa waraaqdaada mushaharka.

Lacagaha mushaharkaaga looga jaro barnaamijka PFML waxa la bilaabi doonaa (*Taariikhda Bilaabidda Mushaharka*) (taariikhda) sicir ah (sicirka khidmadda) %

U-Qalmitaanka Fasax

Waxa dhici karta inaad awooddo inaad fasax ka qaadato shaqada oo aad hesho qayb ka mid ah mushaharkaaga caadiga ah sida sharciga Maine PFML dhigayo. Haddii aad u qalanto iyo haddii kale waxay ku xiran tahay muddada aad ka shaqaysay Maine, iyo xaddiga lacagta aad shaqaysatay. Guud ahaan, waa inaad ka shaqaynaysay Maine ugu yaraan lix bilood. Kadib markaad gudbisoo sheegasho, maareeyuhu wuxuu ogaani inaad u qalanto iyo in kale.

Sababaha Fasaxa.

Gunnooyinka PFML waxa la heli karaa xaaladaha soo socda.

- **Fasax Caafimaad:** Wakhtiyada xaalad caafimaad oo halis ahi ay kaa hor istaagto inaad shaqayso.
- **Fasax Waalidnimo:** Wakhti aad ku xidhmaysa ilme kadib dhalashada, masuul-korineed ama masuul-hayn ka noqoshada ilme.
- **Fasax Qoys:** Wakhti lagu daryeelayo qof qoys ah oo qaba xaalad caafimaad oo daran.

Ogaysiiska Qoran ee Shaqaalaha: Qorshaha dadwaynaha

- **Fasax Qoys Milatari:** Wakhti loogu diyaargaroobayo shaqo-gelinta milatari ee xubin qoys ah.
- **Fasax Ammaan:** Wakhti lagu raadsanayo ammaan kadib xadgudub ama tacaddi.

Xuquuqdaha & Ilaalinta:

Waxa dhici karta inaad awooddo inaad fasax qaadata oo aad hesho lacagaha gunnada ah haddii aad muddo ku filan ka shaqaynaysay Maine, xataa haddii aad tahay shaqaale ku cusub shirkad gaar ah. Si kale haddaan u dhigo, waxaad kala beddeli kartaa loo-shaqeeyayaasha ood welina isticmaali kartaa barnaamijka PFML ee aad ku tabarrucaysay. Loo-shaqeeyahaaga waxa looga baahan yahay inuu joogteeyo gunnooyinka caymiska caafimaadka aad ku hesho heer la mid ah markaad fasax ku jirto.

Loo-shaqeeyayaasha khasab kuma aha inay kuu sii hayaan shaqadaada ilaa aad u shaqaynaysay in ka badan 120 maalmood oo xiriir ah moojee. Markaad u shaqaynaysay loo-shaqeeye in ka badan 120 maalmood, loo-shaqeeyahaagu waa inuu kuu soo celiyo shaqadaada markaad ka soo laabato PFML la ansixiyey. Waxay noqon kartaa isla shaqadii hore, ama mid u dhiganta oo aad ula mid ah dhanka mushaharka, gunnooyinka, iyo shuruudaha iyo xaaladaha shaqada -- waxaad qabato iyo sidaad u qabato.

Sida loo Gudbisto Sheegasho PFML:

Gunnooyinku waxay diyaar noqon laga bialabo Maajo 1, 2026. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan gunnooyinka iyo sida loo codsado, booqo www.maine.gov/paidleave.